## SUURAT An-Nasr:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

***1. Markuu yimaaddo gargaarkii Eebe iyo Fatxiga. (Furashada Maka).***

***2. Ood aragtid Dadkoo Diinta Eebe u soo gali Kooxo.***

***3. U tasbiixso Eebe adoo ku mahadin Dambidhaafna waydiiso illen waa dambidhaaf badanee.***

Qur'an 110: 1-3

***Sharaxa Suuradaan:***

Suuraddaani waxay soo dagtay ayaamihii u dambeeyay ee noloshii Nabiga "Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeele", isagoo Eebe fari in marka Magaalada barakaysan ee Maka la soo celiyo dadkuna islaanimada koox koox u galaan inuu Nabigu cibaadada Eebe badiyo kana toobad dalbo.

Waxaynu ku tusin Suuraddu nicmadoo lagu shukriyo, iyo in Eebe diintiisu u gargaari, waxaa kaloy ku tusisay ajashii Nabiga "Nabadgalyo iyo Naxariis Korkiisa Eebe ha yeelee". Nin daris u ahaa Jaabir Bini Cabdillaahi yaa wuxuu yidhi: 'Waxaan ka soo galay safar markaasuu ii yimid Jaabir bini Cabdillaahi ina salaamay, markaasaan ugu sheekeeyay suu dadku u kala tagay iyo waxay la yimaadeen', markaasuu Jaabir ooyay isagoo leh: 'Waxaan Rasuulkii Eebe ka maqlay "Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee" isagoo leh: 'dadku waxay ku galeen diinta Eebe kooxo, waxayna ugu bixi doonaan kooxo'.

Waxaa wariyay Imaam Axmad.